# Tusmada Borogaraamka Lagu Dhaqmo

apogee enterprises, inc.

Guddiga Borograamka Lagu Dhaqmo ee Shirkadda Abriil 2010
Russ Huffer • Jim Porter • Pat Beithon • Warren Planitzer • Greg Silvestri

Goorta dhaqaalaha uu isbedelo kartideena aan si wanaagsan wax ugu qaban karno, gaar ahaan waxaa aad muhiim u ah in aan raacno ballan qaadkeena adkaa ee la xiriira dabeecada anshaxa. Waxa intaa dheer in dawladda dhexe, ta gobollada, iyo waddamada dibadda ee Apogee ay ganacsiga la samaysaa iyo dadweynaha maalgelinta samaystaa ay si dheeraad ah imminka u dalbanayaan in shirkaduhu fiiro gaar ah u yeeshaan waxqabadkooda si loo hubiyo inay ku dhaqmayaan sharciyada iyo xeerarka iyaga khuseeya. Si shaqaalaha looga caawiyo inay fahmaan waxa laga rajaynaayo si ay waajibaadkooda u gutaan, waxa shirkaddu abuurtay Barnaamijka Ku-Camal-Falka (Company-wide Compliance Program) ee shirkadda oo dhan khuseeya oo ka kooban Tusiyahan; Xeerka Anshaxa iyo Dhaqanka Ganacsiga (Code of Business Ethics and Conduct); xeerar shirkadeed (Corporate Policies) oo koobaya xeerarka ku-camal-falka ee ay tahay inay shaqaalaha oo dhammi ku dhaqmaan.

Shaqalaha oo dhan iyo xubnaha Guddoonka Maamulka waxaa waajib ku ah fulinta shuruucda iyo mabadi'iida uu qoraayo Borograamka Lagu Dhaqmo ee Apogee, Anshaxa Shaqada, iyo Qawaaniinta Shirkadda. Qawaaniinta Shirkada waxay khuseyaan dhamaan shaqalaha shirkaddaha iyo maamulayaasha oo ay ku jiraan shaqalaha laamaha, qeybaha, unugyada, Apogee hoos yimaada. Marka laga reebo shuruucda shirkada ee khilaafsan Sharciga Shirkada ama kuwo kale oo heshiis lagu wada galay ama waajibaad shirkadda ka saran sharciga federaalka iyo staeteka ama qawaaniinta dowladaha hoose.

Qofkii ku xadgudba sharciga, ama Borograamka ku Dhaqanka ama Qawaaniinta Shirkada, nidaamka, tusaaloyinka, ruuliska shaqada iyo wixii la mid ah waxa laga qadayaa tallaabo dishibilin marin ah oo noqon karta in shaqada laga eryo. Intaas waxa dheer shirkadda in ay maxkamad la tiiksan karto qofkii la yimaado xadgudub culus aydoo arrimahaas loo gudbin doono hey' adaha ku shuqul leh arimahas ficilka xadgubka la xiriira. Waxyaabaha ku qoran Tusmadaan, Anshaxa Shaqada iyo Qawaaniinta Shirkadda midkoodna ma aha mana ka hadlaayo caqdi ama kunturaad shaqo siin ah.

Si looga caawiyo shaqaalaha fahamka shuruucda iyo qawaaniinta Shirkadda waxa hoos ku qoran Qawaaniinta Shirkaddaoo kooban. Haddaba shaqaalaha waxa laga doonaya in ay bartaan shuruucda iyo qawaaniinta quseysa shaqadooda. Shaqaaluhu waxay su'aalo ku saabsan tarjumidda xeerka anshaxa iyo dhaqanka ganacsiga amaba xeerar kale ee khaas ahaaneed ee shirkadda ay weydiin karaan Qareenka Guud ee Apogee ee ku sugan xafiiska shirkadda Apogee oo ay ka soo waci karaan 952-487-7514 amaba inay la soo xiriiraan khadka xeerka dhaqanka ee ah 1-800-441-6164 amaba www.guideline.lrn.com (geli magaca ururka Apogee).

Halkan waxa lagu so gudbinaya Borogramka Lagu Dhaqmo oo kooban si ay kuugu fududaato fahamkeeda. Haddii ay jirto xaalad aan loga hadlin halkan waa arrin aan la aqbali karin ama la aqbali karo labadaba. Wixii su' aalo ah kala xiriir horjoogahaaga, waaxda shaqaalaha, ama qareenka Guud ee Apogee ama guddiga Borogramka Ku Dhaqanka.

Xusuusnow in Shirkadda Apogee isku haleyneyso kaalmadaada si ay u fulaan balanqaadka in la fuliyo dhaamman shuruucda, qawaaniinta, anshaxa iyo dabagalka iyo xisaabtan fiican.

## Soosheegidda iyo Baarista Xadgudub

Haddii aad rumaysan tahay inay jirto cid ku xad-gudbaysa sharciga, mabaadida iyo xeerarka Tusiyahan ku jira, Xeerarka Anshaxa iyo Dhaqanka Ganacsiga amaba aad qabto dareen ku saabsan inay cidi ku kacayso waxyaabo mugdi ku jiro oo la xiriira facaa'ilka xisaabaadka iyo hanti-dhowrka, waa inaad soo sheegtaa amaba ka soo warbixisaa xad-gudubka runta ah ee jira amaba ka aad tuhuntay amaba dareenka ku galay. Waxaad uga warbixin kartaa amaba u sheegi karta wixii xad-gudub amaba dareen ah ee aad qabto horjoogahaaga tooska ah (immediate supervisor), maamule sare, waaxdaada arrimaha shaqaalaha, qareenka guud ee Apogee oo lambarkiisu yahay 952-487-7514, amaba waxaad u qori kartaa Qareenka Guud ee Apogee oo cinwaankiisu yahay 7900 Xerxes Avenue South, Suite 1800, Minneapolis, Minnesota 55431-1159. Waxaad kaloo si qarsoodi ah ula soo xiriiri kartaa khadka Hab-Dhaqameedka Apogee (Apogee Code of Conduct) ee ah 1-800-441-6164 amaba www.guideline.lrn.com (geli magaca ururka Apogee). Khadka telefoonka Xeerka Hab-dhaqameedka Apogee waxa maamula hay'ad ka baxsan Apogee oo aan oo aan wax xiriir ah la lahayn.

Warbixin kasta oo ku saabsan ku xadgudub la ogyahay inuu dhacay ama la tuhunsanyahay inuu jiro si deg-deg ah ayaa loo baarayaa. Haddii uu xadgudubku dhacay Apogee waxu qaadayaa tallaabo macquul ah si looga hor tago ficilaada noocaas ah.

### Khadka Telefoonka ee Hab-Dhaqameedka

APOGEE 1-800-441-6164 amaba
www.guideline.lrn.com
(geli magaca ururka Apogee).

# Tusmada Borogaraamka Lagu Dhaqmo

| Qawaniinta Shirkadda | Qawaaniinta | U Kuur Gal |
|---|---|---|
| *Sharciga anti-trust Iyo baratanka* | Shirkadda waa ka mamnuuc inay kula heshiiso ama isfaham kula yeelato shirkadaha baratamayaasheda ah in beec loo gooyo in la farageliyo qimaha badecadda iyo adeegga ama beecdhinka xaladaha kale ee la xirrira beeca. Shirkadda kama xayuubin karto dadka sii gada ama qeybiya badeecada shirkadda soo saarto xuriyadooda inay dib u sii gadaan badeecada shirkadda soo saarto. | Wadahadallo lala yeesho kuwa baratanka kula jira shirkadda oo ku saabsan qiimaha, suuq geynta, badeeco iyo adeeg aan hore loogu dhawaqin, dakhli iyo kharash ama warar kale oo ku saabsan hantida shirkadda. |
| *Sharciyada iyo qawaaniinta ka horjeeda cunaqabateynta* | Shirkadda khasab kuma aha inay fuliso ama taageerto cuna-qabateyn ganacsi oo Marekanka taageerin oo lagu soo rogay waddan. | Ka jawaabid codsi cuna qabateyn ku saabsan codsiga taageeridda cunaqabateyn Carabta ku soo rogtaay Israel. |
| *Iskahorimaadka danaha* | Shaqaalaha waa inay iska ilaaliyaan xaaladaha iyo falalka keeni karo in dantooda iyo tan, shirkadda iska hortimaado. Shaqaalaha qaar waa waajib inay soo buuxiyan foomka su'aalaha eek u saabsan iska hor imaadka danaha. | Hadyado xad-dhaaf ah Ixsaanfal iyo madadaalin, ama dano dhaqaale ku lug leh baratamayaasha shirkadda kuwa alaabta u keena shirkadda iyo macaamiisha kale. |
| *Hadyado iyo waxyaabo Bilaash ah* | Shaqaalaha ma siin karaan mana ka qaadan karaan hadyad ama waxbilaash ah qof ama shirkad donaysa howl ganacsi la yeelato shirkadda ama wax xawilad ah oo shirkaddu ku lug leh. Hadyadaha iyo waxyaabaha bilaashka ah ee an la xiririn xawaalad waa la qaadan kara haddi aysan lahayn qiim aad u sareeya oo aan ka badneyn waxa sida caadiga la isa siyo. | Hadyado iyo wax bilash ah oo qiimo caadiga ka sareeya oo ka yimid kuwa shirkadda alaab u keena, macaamiisha, faranshaays kuwa qeybiya ama talobixiyeyaasha. |
| *Xiriirka dowladda-La macaamilka dowladda Hay'adaha nidaaminta Iyo shaqaalaha* | Lacagsiin, hadyado, cunno intuba lola jeedo in la soo jiito sarkaal siyaasadeed, ama qof u shaqeya dowladda waa mamnuuc. Shaqada loogu yabooho saraakiisha dowladda waa inuu marka hore soo oggolaadaa qareenka guud Apogee. | Lacag, hadyado ama madadaalo loo sameeyo sarkal siyaasadeed, ama shaqaale dowladeed, ama in dad loo shaqaaleeyo, beenabuur, ama wax muhiim ah oo laga kas looga tegay in lagu daro isgaarsiinta lala yessho shaqaalaha dowladda. |
| *Kunturaadyada dowladda* | Sharciga iyo qawaaniinta khuseysa kunturaada dowladda in si adag loogu dhaqmo waa waajib saaran dhammaan shaqaalaha. | Hadyado sarakiisha kunturaada ama wadahadal ku saabsan shaqo mustaqbalka la siiyo saraakissha kunturaada ayodoo aan maamulka habboon ee kunturaadda. |
| *Baarista iyo wareysiyada Dowladda la yeelato* | Wareysiga dowladda codsato, dokumentiga waa in degdeg logu gudbiyo qareenka guud e Apogee shaqalaha la wareysto waa inuu war sax oo dhamystiran sheego. | Warqad u fasaxeys baaris, yeerismaxkamad, codsi ka imaanay baarayal dowladda oo ku saabsan shirkadda ama Shirkado ay la leedahay howl. |

# Tusmada Borogaraamka Lagu Dhaqmo

| Qawaniinta Shirkadda | Qawaaniinta | U Kuur Gal |
|---|---|---|
| *Xawilaadda howgalka Caalamiga ah* | Shirkadda way fulinaysaa shuruucda iyo shuruudaha laga rabo ee u saabsan xawilaada caalamiga iyo shuruucda Marekanka. | Fulin la'aan shuruudaha khusseya sarifka, dhoofinta iyo soo dejinta, meelaha ay ka jirto xayiraad ganacsi iyo sharciyada Marekanka ee diidan cunaqabateynta. |
| *Sharciga Musuqmaasuqa shesheeyaha* | Waa mamnuuc in si sharci darro ah loo siyo lacago iyo hadyado saraakiiil ka tirsan dowlado shisheeye, siyaasiga iyo axsaabta wadamadaas | Lacago la bixiyey, howlfududeyn, hadyado kaash la siiyey saraakiisha siyaasiyiinta, iyo axsaabta waddamada shisheeye. |
| *Laluush iyo howfududeyn* | Laluush iyo hawl fududayn waa mamnuuc. | Lacag bixin aan caddayn sababta loo bixiyey, latashi la qorsheeyey ama hadyado badan ama xad-dhaaf ah. |
| *Fal siyaasadeed iyo xodxodasho* | Shirkadda way fulinaysaa dhammaan shuruucda ku saabsan lacagta lagu bixiyo qaab siyaasadeed iyo xodxodasho. | Deeq siyaasad loo bixiyo oo aan fiicnayn. |
| *Xafidaada hantida iyo xogta shirkadda* | Xogta ku jirta diiwanada shirkadda ama ay abuurto shirkadda, maaliyadda iyo hantida kale xuquuqda halabuurka shirkadda waa in si haboon loo xafido si looga hortago xatooyada iyo burburinta ama shaacinta iyo isticmaalidda aan ruqsadda loo haysan. | Isticmaalka iyo shaacinta xogta, xuquuqda halabuurka ama sooftweerka kombutarka shirkadda leedayay. Shirkadda lacagteeda oo si aan munaasab ahayn loo isticmaalo. Hantida shirkadda oo dano gaar ah loo adeegsado. |
| *Shaqobixinta oo dadku u simanyahay* | Shirkadda shaqo bixinteeda waa loo simanyahay. Umana eegayso dhalasho, midab, caqiido, diin, abtirsi, lab/dheddig, da'a, jinsiyad, dooqa isutagga, lixaad-dhimman, xaalad guur, xaalad la xiriirta in shaqsiga uu qaato kaalmada shacabka la siiyo, xaalad khabiir-isyaano, dagaalsoogalay, ama darajo | Tallabo ku salaysan dhalasho, midab, caqiido, diin, abtirsi, lab/dheddig, da'a, jinsiyad, dooqa isutagga, lixaad-dhimman, xaalad guur, xaalad la xiriirta in shaqsiga uu qaato kaalmada shacabka la siiyo, xaalad khabiir-isyaano, dagaalsoogalay, ama darajo. |
| *Qashqashaad* | Qashqashaad shukaansi, qashqashaad ku saabsan dhalasho, midab, diin, lab/dheddig, da'a, abtirsi, jinsiyad, lixaad-dhimman, dooqa isutagga ama oggola umana dulqaadanayso shirkadda, xaalad guur, xaalad la xiriirta in shaqsiga uu qaato kaalmada shacabka la siiyo, xaalad khabiir-isyaano, ama waxyaabo kale oo la xiriira arrintaa shirkadda uma dulqaadaneyso. | Taabasho aan la codsan, kaftan ujeeddo leh hadal naag/nin, dooqa isutagga, ama qashqashaad uu sameeyo ama lagu sameeyo qofka shaqaalaha ah, macaamiisha, iyo dadyowga kale. Qashqashaad ku salaysan wax yaabo kale oo reeban. Cabsi-gelin iyo hadallo-sarbeed la xiriira ogolaanshaha ama diidmada shukaansiga waa mid saameyn doona xaaladahaaga shaqada. |
| *Mukhaadaraadka iyo khamriga oo ka reeban goobta shaqada. Sheybaaris mukhaadaraadka iyo khamriga* | Shaqaalaha waa ka mamnuuc in ay soo shaqo tagaan ama hawl u qabtaan shirkadda ayagoo cabsan khamri ama mukhaadaraad, shirkadda way ka baari kartaa shaqalaha iyo kuwa shaqodoonka ah khamri iyo mukhaadaraat. Goobta shaqada lalama iman karo khamri iyo mukhaadaraat. | In shaqo loo qabto shirkadda khamri iyo mukhaadaraat dad wata ama ka ganacsanaya khamri iyo mukhaadaraat waa mamnuuc shirkadda dhismaheeda ama waqtiga shaqada waqtiga shaqada lagu jiro. |

## Tusmada Borogaraamka Lagu Dhaqmo

| Qawaniinta Shirkadda | Qawaaniinta | U Kuur Gal |
|---|---|---|
| *Sharciga anti-trust Iyo baratanka* | Shirkadda waa ka mamnuuc inay kula heshiiso ama isfaham kula yeelato shirkadaha baratamayaasheda ah in beec loo gooyo in la farageliyo qimaha badecadda iyo adeegga ama beecdhinka xaladaha kale ee la xirrira beeca. Shirkadda kama xayuubin karto dadka sii gada ama qeybiya badeecada shirkadda soo saarto xuriyadooda inay dib u sii gadaan badeecada shirkadda soo saarto. | Wadahadallo lala yeesho kuwa baratanka kula jira shirkadda oo ku saabsan qiimaha, suuq geynta, badeeco iyo adeeg aan hore loogu dhawaqin, dakhli iyo kharash ama warar kale oo ku saabsan hantida shirkadda. |
| *Sharciyada iyo qawaaniinta ka horjeeda cunaqabateynta* | Shirkadda khasab kuma aha inay fuliso ama taageerto cuna-qabateyn ganacsi oo Marekanka taageerin oo lagu soo rogay waddan. | Ka jawaabid codsi cuna qabateyn ku saabsan codsiga taageeridda cunaqabateyn Carabta ku soo rogtaay Israel. |
| *Iskahorimaadka danaha* | Shaqaalaha waa inay iska ilaaliyaan xaaladaha iyo falalka keeni karo in dantooda iyo tan, shirkadda iska hortimaado. Shaqaalaha qaar waa waajib inay soo buuxiyan foomka su'aalaha eek u saabsan iska hor imaadka danaha. | Hadyado xad-dhaaf ah Ixsaanfal iyo madadaalin, ama dano dhaqaale ku lug leh baratamayaasha shirkadda kuwa alaabta u keena shirkadda iyo macaamiisha kale. |
| *Hadyado iyo waxyaabo Bilaash ah* | Shaqaalaha ma siin karaan mana ka qaadan karaan hadyad ama waxbilaash ah qof ama shirkad donaysa howl ganacsi la yeelato shirkadda ama wax xawilad ah oo shirkaddu ku lug leh. Hadyadaha iyo waxyaabaha bilaashka ah ee an la xiririn xawaalad waa la qaadan kara haddi aysan lahayn qiim aad u sareeya oo aan ka badneyn waxa sida caadiga la isa siyo. | Hadyado iyo wax bilash ah oo qiimo caadiga ka sareeya oo ka yimid kuwa shirkadda alaab u keena, macaamiisha, faranshaays kuwa qeybiya ama talobixiyeyaasha. |
| *Xiriirka dowladda-La macaamilka dowladda Hay'adaha nidaaminta Iyo shaqaalaha* | Lacagsiin, hadyado, cunno intuba lola jeedo in la soo jiito sarkaal siyaasadeed, ama qof u shaqeya dowladda waa mamnuuc. Shaqada loogu yabooho saraakiisha dowladda waa inuu marka hore soo oggolaadaa qareenka guud Apogee. | Lacag, hadyado ama madadaalo loo sameeyo sarkal siyaasadeed, ama shaqaale dowladeed, ama in dad loo shaqaaleeyo, beenabuur, ama wax muhiim ah oo laga kas looga tegay in lagu daro isgaarsiinta lala yessho shaqaalaha dowladda. |
| *Kunturaadyada dowladda* | Sharciga iyo qawaaniinta khuseysa kunturaada dowladda in si adag loogu dhaqmo waa waajib saaran dhammaan shaqaalaha. | Hadyado sarakiisha kunturaada ama wadahadal ku saabsan shaqo mustaqbalka la siiyo saraakissha kunturaada ayodoo aan maamulka habboon ee kunturaadda. |
| *Baarista iyo wareysiyada Dowladda la yeelato* | Wareysiga dowladda codsato, dokumentiga waa in degdeg logu gudbiyo qareenka guud e Apogee shaqalaha la wareysto waa inuu war sax oo dhamystiran sheego. | Warqad u fasaxeys baaris, yeerismaxkamad, codsi ka imaanay baarayal dowladda oo ku saabsan shirkadda ama Shirkado ay la leedahay howl. |

## Tusmada Borogaraamka Lagu Dhaqmo

| Qawaniinta Shirkadda | Qawaaniinta | U Kuur Gal |
|---|---|---|
| *Xawilaadda howgalka Caalamiga ah* | Shirkadda way fulinaysaa shuruucda iyo shuruudaha laga rabo ee u saabsan xawilaada caalamiga iyo shuruucda Marekanka. | Fulin la'aan shuruudaha khusseya sarifka, dhoofinta iyo soo dejinta, meelaha ay ka jirto xayiraad ganacsi iyo sharciyada Marekanka ee diidan cunaqabateynta. |
| *Sharciga Musuqmaasuqa shesheeyaha* | Waa mamnuuc in si sharci darro ah loo siyo lacago iyo hadyado saraakiiil ka tirsan dowlado shisheeye, siyaasiga iyo axsaabta wadamadaas | Lacago la bixiyey, howlfududeyn, hadyado kaash la siiyey saraakiisha siyaasiyiinta, iyo axsaabta waddamada shisheeye. |
| *Laluush iyo howfudedeyn* | Laluush iyo hawl fududayn waa mamnuuc. | Lacag bixin aan caddayn sababta loo bixiyey, latashi la qorsheeyey ama hadyado badan ama xad-dhaaf ah. |
| *Fal siyaasadeed iyo xodxodasho* | Shirkadda way fulinaysaa dhammaan shuruucda ku saabsan lacagta lagu bixiyo qaab siyaasadeed iyo xodxodasho. | Deeq siyaasad loo bixiyo oo aan fiicnayn. |
| *Xafidaada hantida iyo xogta shirkadda* | Xogta ku jirta diiwanada shirkadda ama ay abuurto shirkadda, maaliyadda iyo hantida kale xuquuqda halabuurka shirkadda waa in si haboon loo xafido si looga hortago xatooyada iyo burburinta ama shaacinta iyo isticmaalidda aan ruqsadda loo haysan. | Isticmaalka iyo shaacinta xogta, xuquuqda halabuurka ama soofteweerka kombutarka shirkadda leedayay. Shirkadda lacagteeda oo si aan munaasab ahayn loo isticmaalo. Hantida shirkadda oo dano gaar ah loo adeegsado. |
| *Shaqobixinta oo dadku u simanyahay* | Shirkadda shaqo bixinteeda waa loo simanyahay. Umana eegayso dhalasho, midab, caqiido, diin, abtirsi, lab/dheddig, da'a, jinsiyad, dooqa isutagga, lixaad-dhimman, xaalad guur, xaalad la xiriirta in shaqsiga uu qaato kaalmada shacabka la siiyo, xaalad khabiir-isyaano, dagaalsoogalay, ama darajo | Tallabo ku salaysan dhalasho, midab, caqiido, diin, abtirsi, lab/dheddig, da'a, jinsiyad, dooqa isutagga, lixaad-dhimman, xaalad guur, xaalad la xiriirta in shaqsiga uu qaato kaalmada shacabka la siiyo, xaalad khabiir-isyaano, dagaalsoogalay, ama darajo. |
| *Qashqashaad* | Qashqashaad shukaansi, qashqashaad ku saabsan dhalasho, midab, diin, lab/dheddig, da'a, abtirsi, jinsiyad, lixaad-dhimman, dooqa isutagga ama oggola umana dulqaadanayso shirkadda, xaalad guur, xaalad la xiriirta in shaqsiga uu qaato kaalmada shacabka la siiyo, xaalad khabiir-isyaano, ama waxyaabo kale oo la xiriira arrintaa shirkadda uma dulqaadaneyso. | Taabasho aan la codsan, kaftan ujeeddo leh hadal naag/nin, dooqa isutagga, ama qashqashaad uu sameeyo ama lagu sameeyo qofka shaqaalaha ah, macaamiisha, iyo dadyowga kale. Qashqashaad ku salaysan wax yaabo kale oo reeban. Cabsi-gelin iyo hadallo-sarbeed la xiriira ogolaanshaha ama diidmada shukaansiga waa mid saameyn doona xaaladahaaga shaqada. |
| *Mukhaadaraadka iyo khamriga oo ka reeban goobta shaqada. Sheybaaris mukhaadaraadka iyo khamriga* | Shaqaalaha waa ka mamnuuc in ay soo shaqo tagaan ama hawl u qabtaan shirkadda ayagoo cabsan khamri ama mukhaadaraad, shirkadda way ka baari kartaa shaqalaha iyo kuwa shaqodoonka ah khamri iyo mukhaadaraat. Goobta shaqada lalama iman karo khamri iyo mukhaadaraat. | In shaqo loo qabto shirkadda khamri iyo mukhaadaraat dad wata ama ka ganacsanaya khamri iyo mukhaadaraat waa mamnuuc shirkadda dhismaheeda ama waqtiga shaqada waqtiga shaqada lagu jiro. |

## Tusmada Borogaraamka Lagu Dhaqmo

| Qawaniinta Shirkadda | Qawaaniinta | U Kuur Gal |
|---|---|---|
| *Sharciga iyo nidaamka ku saabsan bii'ada* | Shirkada waxay fulinaysa sharciga iyo qawaaniinta u degsan bii'ada. | Diwaangelin aan dhamaysinayn oo ku saabsan bii'ada. Wax qubtay ama meel ku daatay oo aan la soosheegin. Qashinka oo hab munaasab ah lo tuurin. Qashin qub iyo qashin qaad aan amar loo haysan oo la isticmaalo. |
| *Xog-oge ka ganacsada iyo xogta ganacsiga hoos looga sheego* | Shaqalaha ma gadan karaan mana iibin karaan saamiyada iyo hantida Apogee marka ay ogyihiin "xog" aan la shaacin. Xogna ma siin karaan dad gadanaya ama ka bayacmushtaraya samiyada iyo hantida Apogee. | Ka ganacsi ama xog hoose siin dad kale xogtaas oo aysan ogeyn dadweynaha ka ganacsi shirkado kale oo Apogee la leedahay howlo ganacsi. |
| *Diiwaangelin iyo xoghayn sah ah* | Warbixin ku saabsan heerka dhaqaale ee shirkadda diiwaanada iyo wixii dukumenti ah oo loo diro dad kale waa inay ahaadan sax, loona diyaariyaa hab waafaqsan sida shairkadda u rabto. | Beenabuur, diiwaangelin kala dhantalan, habka u degsan xisaabaadka oo aan la raacin. |
| *Warisgaarsiinta iyo xogta Electroonikada ah* | Qalabka warka la isku gaarsiyo (telefonka, kombuyuutarka ) waxa loogu tala galay in shirkadda loogu shaqeeyo. Shirkadda waxay xaq u leedahay in ay fatashto ama ilaaliso sida loo isticmaalo iyo waxyabaha ku keydsan feelasha isgaarssiinta. | Qalabka shirkadda oo lagu daawado ama lagu diro wax dad lagu qashqasho iyo waxyaabo sharci darro ah sida qaawini ama loo adeegsado dani shaqsi ah oo badan. |
| *In loo bandhigo macluumaa Dadweynaha, warbaahinta iyo shaandheeyeyaal* | Soo bandhigidda macluumaa dka shirkadda waxa sameyn afhayeen ruqsad u haysta. | Been, war wax lagu khaldo warjaraa'id, xogwaran loo gudbiyo dowladda iyo hay'adaha wax nidaamiya. Xoghoosaadka shirkadda oo la shaaciyo. |
| *Qalqaalin la'aan* | Shirkadda waxay mamnuuca ka dhigaysa qalqaalinta, qeybinta qoraallada waqtiga iyo goobta shaqada oo aanay ku jirin qaaraan uruurinta sanadka ee United Way. | Alaab gadid si qaraan logu guro qoyska ama urur samafal ama warqadaha muujinaya sawir alaab beec ah sida wax la isku qurxiyo maacuunta, hadyadaha goobta iyo waqtiga shaqada. |
| *In la soo baaro asalka shaqaalaha ama kan shaqodoonka ah* | Shirkadda way soo asal baray saa dadka shirkadda ka tirsanayn ee la shaqaaleynayo iyo dadka shirkadda ah ee loo beddelayo jagooyinka qaar. | Shaqalaha cusub oo aan la soo asal baarin iyo dadka qabanya jagooyinka muhiimka ah. |
| *Fasax caafimaadka iyo Qoyska* | Shirkadda waxay fasax caafimaadka ah ama qoyska ah siinaysaa shaqaalaha mudan sida uu qabo sharciga federaalka iyo gobol iyo dowladaha hoose. | Shaqaale mudan fasaxa qoyska iyo caafimmadka oo loo diido fasaxa. |

## Waajib Kaa Saaran Ku Dhaqanka

Dhammaan shaqaalaha iyo maamulayaasha Apogee iyo shaqaalaha shirkadaha hoos yimaada Apogee, faracyada, qaybta suuq-geynta, xubin ama rug ganacsi ah waxa laga filayaa inay ku dhaqmaan qawaaniinta iyaga khusaysa, xeerarka, sharciyada iyo awaamirta xeerarkaas.Waxaa lagaa rabaa in aad iska xil saarto barashada wixii ku saabsan gudashada waajibaadkada si aad uga nabad gasho khatarta imaan karta iyo inaad garato goorta aad u baahantahay inaad raadsato talo la xiriirta ku dhaqanka. Haddii aad ku kacdo wax aan sharci ahayn amaba ka baxsan anshaxa shaqada, cudurdaar ma kuu noqonayso inaad tiraahdo ma garanaynin in waxaan sameeyey aanay ahayn wax habboon amaba maamulaha ayaa igu amray inaan sameeyo.

## Mamulka Waajibka Ku Dhaqanka

Dhammaan xubnaha maamulka waa inay ku camal-falaan Barnaamijka Ku Camal-falka ee Apogee (Apogee Compliance Program) isla markaana ay qaadaan tallaabooyin macquul ah si ay u kobciyaan ku dhaqanka sharciga iyo anshaxa iyo mabaadida iyo xeerarka shirkadda. Suberfaysarada iyo madaxda waa inay qaadaan tallabo caqli gal ah hirgelinta ku dhaqanka sharciga, anshaxa shaqada, iyo qawaaniinta shirkadda. Madaxa shirkadda waa in ay hubiyaan in adiga aad heshid macluumaat iyo tusalooyin kugu filan oo kuu suurtogeliyo inaad fahmto kuna dhaqanto shuruucda iyo anshaxa shaqada. Madaxda waxa kaloo laga rabaa in shaqalaha ku dhiirigeliyan in ay ka hadlaan wixi ay qoonsadaan,suaalo ay weydiin karaan iyo arimaha la xiriira shuruucda, anshaxa shaqada iyo xisaabcelin iyo dabagal mugdi ku jiro.

## Soosheegidda iyo Baarista Xadgudub

Haddii aad rumaysan tahay in ay jirto cid ku xad-gudbaysa sharciga, amaba mabaadida amaba xeerarka Tusiyahan (guide), amaba wax kasta oo khuseeya xeerarka shirkadda, amaba aad qabtid dareen ama su'aalo la xiriira sida xisaabaadka iyo hanti- dhowrka loo sameeyo, waa inaad soo sheegtaa amaba ka soo warbixisaa xad-gudubka jira amba aad dareentay. Waxaad u soo sheegi kartaa amaba uga soo warbixin bixin kartaa sidatan:

1. Adigoo la xiriira horjoogahaaga tooska ah (immediate supervisor), maamule sare, waaxda arrimaha shaqaalaha, Qareenka Guud ee Apogee oo lambarkiisu yahay 952-487-7514, amaba xubin ka tirsan Guddiga ku Camal-falka Xeerarka ee Apogee oo aad ka soo wici karto 952-835-1874;
2. Adiga oo usoo qora Qareenka Guud ee Apogee ama Guddiga Borograamka Lagu Dhaqmo cinwaanka ama addresska hoos ku qoran: 7900 Xerxes Avenue South, Suite 1800, Minneapolis, Minnesota 55431-1159.
3. Adigoo si qarsoodi ah ula soo xiriira khadka Hab- Dhaqameedka Apogee (Apogee Code of Conduct) ee ah 1-800-441-6164 amaba www.guideline.lrn.com (geli magaca ururka Apogee). Khadka telefoonka ee Hab-Dhaqameedka Apogee waxa maamula hay'ad ka baxsan Apogee oo aan wax xiriir ah la lahyn. Haddii aad rabto inaad warbixin ku gudbiso af aan ahayn af-Ingiriisi, waa inaad soo wacdaa khadka Hab-Dhaqameedka Apogee ee ah 1-800-441-6164 oo aad codsataa turjubaan.

Warbixin kasta oo ku saabsan ku xadgudub la ogyahay inuu dhacay ama la tuhunsanyahay inuu jiro si deg-deg ah ayaa loo baarayaa. Haddii uu xadgudubku dhacay Apogee waxu qaadayaa tallaabo macquul ah si looga hor tago. Intaas waxa dheer soosheegidaa arrimaha ku saabsan xisaabcelin ama xisaabdabagal waxa loo sooshegayaa guddiga xisaabdabagalka ee boorrka (golaha) u taliya Apogee. Waxad susuusnaataa soosheegid la'aanta iyo ka raali naqoshada ku xadgudubka sharciga, Borogramka Ku Dhaqanka ama Qawaaniita Shirkadda waxay keeni kartaa dishibilin marin oo noqon kara shaqo ka eryid joojin.

## Sirxafididda iyo Reebida Argoosi La Xiriira Soo Sheegid

Ilaa inta uu sharciga saamaxayo shirkadda waxay ku dadaaleysaa inay qariso magacyada dadka soosheega xadgudub jira ama la tuhunsanyahay inu jiro oo ku saabsan jebinta sharciga, Borogramka Lagu Dhaqmo ee Apogee iyo Qawaaniinta Shirkadda ama ku saabsan xisaabcelin iyo xisaabdabagal mugdi ku jiro. Sirta waxa loo xafidaya qofka soo sheega falka iyo kan laga soo sheegay labaduba. Wana muhiim in shaqaalaha ku lug leh soo sheegida iyo kan baarista ku socoto labaduba dhowraan balan qaadka sirxafididda.

Waa arrin mamnuuc ah in qof shaqaale ahi kula kaco ciqaabid aargudasho ah qof shaqaale ah oo si daacad ah u soo sheegay xadgudub, xisaabin iyo diiwaangelin iyo xisaabdabagal intuba mugdi ku jiro. Shirkadda waxay dhiirogelinaysaa in daacad ahaan loo soosheego wixi ku saabsan xadgudub ama xisaabcelin, diwaangelin, iyo xisabdabagal aan caddeen.

## Dishibliin Marinta Shaqalaha Ku Kaca Xadgudub

Markii la ogaado in qof shaqaalaha ahi ku kacay xadgudub la xiriira sharciga, Borogramka Lagu Dhaqmo Ee Apogee, Ama Qawaaniinta Shirkadda ama uu ka qeyb qaatay xisaabcelin, iyo diwaangelin ama xisaabdabagal aan hagaasaneyn, qofkas shaqalaha ahi waxa lagu qadayaa dishibilin marin oo ay ku jiri karto in shaqada laga eryo. Intaas waxa dheer in shirkadda ay maxkamad la tiigsato iyo weliba in loo gudbiyo hay'adaha ku shaqo leh. Tallabo dishibilin marin ah waxa lagu qaadaya suberfaysarkii ama maamulihii ogolaada ama tallaabo ku habboon ka qaadi waaya sharcidarro, anshax xumo iyo akhlaaq kale oo aan habbooneyn.

Shirkadda xeerka u degsan waa in dishibilin marinto si isku mid ah loo qaado. Hase yeshee kiis kasta wuxuu yeelan karaa dishibliin marin u gaar ah. Wixi dukumenti ah oo la xiriira dishibilin marinta waxa lagu haynayaa malfka shaqaalaha lagu qaaday ayado la eegi doono lana tixgelin doono waqtiga dallacaadaha qiimaynta la bixiyo.

## Gunaanad

Shirkadda waxay ballan qaaday in ay howleheeda ganacsi u fuliso si hufnaan ah iyo qaab sharciga waafaqsan. Tusmadan waxa loola jedaa in ay ku fududayso fahmidda sidii aad ugu dhaqmi lehayd sharciga, iyo mabadi'iida Apogee ee anshaxa iyo akhlaaqda lagaa rabo. Hase-yeshee adiga ayey ku jirtaa in aad maskaxdaada adeegsato oo aad tubta toosan ku tallabsato. Xusuusnow mar kasta inaad adeegsato maskaxda iyo caqliga wanaagsan.

Somali translation
Tariikhda: Abriil 2010
Dib-u-daabicid:11
©Apogee Enterprises, Inc., 2010

# Tusmada Borogaraamka Lagu Dhaqmo

| Qawaniinta Shirkadda | Qawaaniinta | U Kuur Gal |
|---|---|---|
| *Shaqo istikhyaar ah* | Shaqaalaha way isaga tegi karaan shaqada markay doonan iyo sababtay doonaan. Sidoo kale shirkadda shaqada way ka eryi kartaa shaqaalaha markay doonto sabab iyo sabab la'aan ayadoo aan siin wax digniin ah oo hore. | Waxay isku dayeysaa in ay wax ka beddesho istikhyaarka shaqada ayadoo aanay jirin heshiis qoraal ah oo uu saxiixay sarkaal idin ka haysta shirkadda. |
| *Dishibilin marinta Iyo shaqo ka eryidda shaqaalaha* | Shirkadda waxay xaq u leedahay inay dishibilin marin ama shaqo ka eryid ku sameyso shaqaaliha waxy kaloo shirkadda istikhyaar u leedahay inay qaabka dishibilin marinta siday rabto u fuliso kiis kasta. | Waxay isku dayeysa in ay xadaddo dishibilin marinta shirkadda fuliso. |
| *Dadka wax soo ka shifa* | Qofkii shaqaala ah ee si anay ku jirin xiqdi u soosheega xadgudub sharci ama xadgudub Borogramka Lagu Dhaqmo ama Qawaniinta Shirkadda ee Apogee ama arrin la xiriirta xisaabcelin Iyo diiwaangelin iyo xisaabdabagal intuba mugdi ku jiro lagu ma sameyn karo ciqaab aar goosi ah. | Handadaad ah ama cagajugleyn loo geysto qofkii soo kashifay ku xadgudubka Borogramka Lagu Dhaqmo ee Apogee ama Qawaaniinta Shirkadda ama xisaabcelin aan ficnayn. |
| *Hirgelinta iyo fasiradda Borogramka Lagu Dhaqmo* | Guddiga Borograamka Lagu Dhaqmo ee Shirkadda ayaa mas'uul ka ah dhaqan gelinta iyo ilaalinta Borogramka Lagu Dhaqmo ee Apogee. | Iska indho tir iyo "ka wareegasho" lagu sameeyo sharciga ama Borogramka Lagu Dhaqmo ama Qawaaniinta Shirkadda Apogee. |
| *Dabagalka iyo ilaalinta Borogramka Lagu Dhaqmo* | Shaqaalaha waa inay raacaan Qawaaniinta Shirkadda soonasheegaan wixi xadgudub ah gacanna siyaan dadaalka shirkadda ah inay uruuriso wararka ku saabsan Ku Dhaqanka. | Qawaaniinta codsi ah "iska ilow"indhaha ka qarso marka laga hadlo ku dhqan. Soosheegid La'aan xadgudub la xirrira Borogramka Lagu Dhaqmo ee Apogee iyo arrimaha kale la xirrira xasaabcelin mugdi leh. |
| *Dishibilin marinta la Xiriirta Borogramka Lagu Dhaqmo* | Shaqaalihii ku xadgudba sharciga ama Borogramka Lagu Dhaqmo ama Qawaaniita Shirkadda Apogee waxaa lagu qaadayaa dishibilin marin ku habon. | Shaqaalaha ku xadgudba sharciga oo aan la dishibilin marin. |
| *Aqoon iyo xaqiijin Ku saabsanBorogramka Lagu Dhaqmo* | Shaqaalaha wa inay ka qaygalaan tababarka Borogramka Lagu Dhaqmo iyo waa inay xaqiijiyan aqoota ay u leeyihin iyo wajibka ka saran Borogramka Lagu Dhaqmo ee Apogee. | Xaqiijin la'an ku dhaqanka Borogram Tababar lagaqaybgelin. |
| *Soosheegidda iyo Baarista Xadgudub* | Waa ku wajib shaqalaha deg deg u soosheegiddax adgudubka sharciga, ama jebinta Borogramka Lagu Dhaqmo ee Apogee iyo Qawaaniinta Shirkadda ee jira ama la tuhunsan yahay. | Warbixinta waxa loo qaadayaa daacad waxana loo xilsarayaa baarista shaqsiyaad ku habon. Warbixinta waa loo samayn karaa sir. |